

# Ogow xuquuqahaaga

## markaad shaqaynayso!

### Waxaad leedahay xuquuqo!

#### Xuquuqaha shaqaaluhu waa xuquuqaha

**bani'aadamka!** Qof kasta oo shaqeeya waxa uu Netherlands ku leeyahay xuquuq shaqo oo isku mid ah, waxay doonto ha noqoto nooca shaqada aad qabato. Magangalyo-doон ahaan waxaad si sharci ah ugu shaqayn kartaa shuruudo gaar ah. Laakin xitaa haddii aan (ama aan weli laguu oggolaan) inaad si sharci ah u shaqeysyo, waxaad well leedahay xuquuqaha shaqada markaad shaqeysyo.

#### Tusaale ahaan, waxaad xaq u leedahay:

- >> Mushaharka ugu yar (qiyaas ahaan waa €13 saacadiiba);
- >> Maalamaha nasashada, fasaxyada iyo wakhtiyada firaaqada;
- >> Fasaxa lacagta ah haddii aad uur leedahay ama xanuunsado;
- >> Fursada aad ku booqanayso dhakhtar haddii aad booqanayso.



U diyaargarov markaad shaqo raadinayso. Fiilo gaar ah u yeelo marka dadku kuugu soo dhawaadaan (qof ahaan ama khadka tooska ah) shaqada. Shaqooyinka aan rasmiga ahayn iyo shaqooyinka xagga dhismaha, nadaafadda, qoyska iyo beeraha ayaa halis sare ugu jira ka faa'iidsiga. Sidoo kale, kuwa ka shaqeeya meelaha galmaida ayaa aad ugu nugul dhibaataintya.



*Ka digtoonow! Waxaa jira shuruudo gaar ah oo magangelyo-doonka loo oggol yahay inay ku shaqeeyaan. Haddii aad raaci weydo tilmaamahan, waxa laga yaabaa inay cawaaqib ku yeelato adiga iyo loo-shaqeeyahaaga.*

Nasiib darro, waxaa jira loo-shaqeeyayaal isku dayaya inay ka faa'iidaystaan muhajirinta oo ay dadka ka helaan inay ku shaqeeyaan wax ka yar mushaharka ugu yar iyo/ama xaalado aan badqabin. Xaaladaha halista ah, tan waxaa loo yaqaan hadimayn.

### Sidaan ku ahaanayso mid badqaba!



Tallooyinka aad ku ilaalinayso naftaada:

1. Ogow xuquuqahaaga! Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada shaqada oo ku qoran luqado kala duwan websaaytka RefugeeHelp.
2. Ka digtoonow shaqooyink lagu soo bandhigo (oonlaayna) ah oo u muuqata mid run ah.
3. Ka digtoonow inaad la wadaagto macluumaadkaaga gaarka ah iyo sawiradaada/muuqaaladaada shaqsiyed qof aad intarnatka ka taqaano.
4. Weydi qof aad wada joogtaan markaad la kulanto shaqaalaysiye aad aragtay markii kuugu horaysay iyo/ama hubi in qofku garanayo halkaad joogto.
5. La samee heshiisyso ku saabsan mushaharkaaga, saacadaha shaqada iyo marka lagu siin doono lacagtaada booskaaga.
6. Ku codso qandaraas luqadda aad fahmi karto oo koobi ka hayso.
7. Soo ururi caddaynta inaad meel ka soo shaqeysay, sida sawirro. Lasoco saacadaha aad shaqeysay iyo inta lacag lagu siiyay. Keydi heshiisyada shaqada sida fariimaha WhatsApp iyo iimaylada. Markaa waxaad haysataa caddayn aad ku heli karto waxa aad xaaq aad leedahay, haddii arrimuhu u socon waayaan sidii la qorsheeyay (xitaa haddii aanad qandaraas lahayn!).
8. Weydiiso caawimaad haddii aad dhibaata kalokulanto shaqadaada ama booskaaga.



## Caawimo weydiiso markaad:

- Aanad dareemayn badqab la'aan.
- Kujirto xaalad aan wali la bixin ama aan guud ahaan la bixin.
- Waxaad ku sugar tahay halis/caafimaad la'aan/ shaqo dambiyeed.
- Booskaagu si aan wanaagsanay kuula dhaqmo.
- Waxa lagugu qasbay inaad shaqaysay, (onlaayn ah) shaqo galmo, ama hawlo fal dambiyeed.
- Aad ku sugar tahay xaalad cabsi galin oo aanad dareemayn inaad si madaxbanaan iskaga joojin karin.
- Baasaboorkaagii waa lagaala wareego.
- Loo-shaqeeyahaagu anuu kuu ogolayn inaad xidhiidh la yeelato qoyskaaga ama saaxiibadaa.
- Aan laguu ogolayn inaad dhakhtar booqato marka aad xanuunsan tahay.
- Adiga ama qoyskaaga waa lagu handaday ama waa la caayay.
- Booskaagu wuxuu ka been sheegay nooca shaqada aad qabanlahayd.
- Booskaaga aya ku hanjabaya inuu u sheegayo booliska inaadan haysan wax waraaqo ah.

Ma aqoonsan tahay mid ka mid ah xaaladahan? Adiga ama qof aad taqaan ma qabaa dhibaatooyinkan oo kale marka shaqada? Weydiiso caawimo!

## Caawimo iyo tallo

Ma u baahan tahay caawimo ama tallo? Waxaa jira hay'ado ku caawin kara lacag la'aan haddii ay dhacdo hadimooyin ama dhibaatooyin xagga shaqada ah, xitaa haddii aadan haysan ruqsad shaqo.

- Kala hadal dhibaatooyinka qof aad ku kalsoon tahay, tusaale ahaan qofka aad la xidhiidho ee xarunta soo dhaweynta.
- La xidhiidh **FairWork** haddii ay dhibaato kaa haysato shaqada. Caadi ahaan waxay ku caawin karaan luqaddaada: **0031 6 51 77 12 49** (**WhatsApp**) / [africa@fairwork.nu](mailto:africa@fairwork.nu).
- Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan shaqada iyo xuquuqda shaqada oo ku qoran luqaddo kala duwan bogga internetka ee **RefugeeHelp**.
- Waxaad **xaq u leedahay** inaad si badbaado leh ugu **wargeliso kiiska** booliska. Haddii ay surtagal tahay, marka hore kala hadal tan hay'ad gargaar ama qareen. Haddii ay dhacdo xaalad naf-gooyo ah, wac lambarka degdegga ah 112.
- Haddii aad hayso su'aal, waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Laanqayrta Cas ee **WhatsApp** khadka caawinta 0031 - 970 102 869 64.

Red Cross

WhatsApp Helpline



RefugeeHelp



FairWork

